Waxa la filanayo in lala kulmo marka loo Tagayo Dhakhtarka

Loogu talogalay Hooyooyinka

In la aado dhakhtarka Dalka Maraykanka waxay kaa dhigi kartaa in aad dareentid wel-wel ama raaxo la'aan. Tani waa caadi. Caadooyinka dhaqameed ee ku saabsan waxyaabaha la sameeyo ee daryeelka caafimaadka ah iyo in loo tago dhakhtarka waa mid ka duwan meesha aad ka timid ee adduunka ah. Labada dhakhtar ee ugu baddan ee ay dumarku ugu tagaan Dalka Maraykanka waa Dhakhtarada Daryeelka Aasaasiga ah, kuwaas oo qiimeyn ku samaynaya caafimaadkaaga guud, iyo OB/GYN (Dhakhtarka Dhalmada ama Dhakhtarka Dumarka) midkaas oo u siinaya daryeelka caafimaadka si gaar ah dumarka kuna takhasusay caafimaadka taranka, uurka, iyo dhallida ilmaha. Waxaa lagu talinayaa in aad u tagtid OB/GYN iyo Dhakhtarka Daryeelka Aasaasiga ah halmar sannadkii si laguugu sameeyo baaritaanka ficnaanshaha dumarka.

Marka aad aadid ballanta OB/GYN, waxaad la kulmi doontaa dad baddan oo aad u kala duwan. Marka hore, qofka soo dhoweynta jooga ayaa kaa qoraya macluumaadkaaga shakhsiyeed sida magacaaga, taariikhdaada dhallashada, iyo macluumaadka ceymiska. Kadibna caawiye caafimaad ama kalkaaliye ayaa ku samaynaya cabiraad miisaankaaga, dhererkaaga, cadaadiska dhiigaaga, mararka qaarna baaritaan dhiiga ah ama muunad kaadidada ah. Sidoo kale waxay ku weydiin doonaa su'aalooyin ku saabsan sida uu xaalkaagu yahay iyo haddii ay jiraan wax wel-welo caafimaad ah oo aad qabto. Waxay kuu xiri doonaan maro waxayna ku siin doonaan wakhti aad dharka isaga bixisid, kadibna ku xiratid marada, kadibna waxaad ku fadhiisanaysaa sariirta baaritaanka.



Nidaamka Taranka Ee HAWEENKA

Dhakhtarka ayaa kadibna kuu soo galaya kuna weydiinaya su'aalooyin dheeraad ah oo ku saabsan caafimaadkaaga. Waxaa dhici karta in ay dhagaystaan garaaca wadnahaaga kadibna kugu sameeyaan baaritaan jireed midaas oo ay ku riixayaan calooshaada ama naasahaaga si ay u arkaan haddii ay jiraan wax aanan caadi ahayn.

Sidoo kale dhakhtarka wuxuu ku weydiin doonaa su'aalooyin xiriir la leh caafimaadka dhallida, wareega dhiiga caadadaada, iyo galmadaada. Baaritaanadan waa kuwo doorasho ah, laakiin waa lasoo jeedinayaa. Midaan waa fursad wanaagsan oo aad ugu weydiin karto ayaga su'aalooyinka ku saabsan uurka ama wax kasta oo arimo caafimaad ah oo xiriir la leh Gudniinka Gabdhaha.

Dhakhtaradu waxay samaynayaa baaritaanka misigta iyo baaritaanka raximka ama ilmo galeenka halmar sannadkii si ay u baaraan caafimaadka qaybta jirkaaga ee taranka ama dhalmada. Haddii aad hore u samaysay Gudniinka Gabdhaha baaritaanadaan waxay noqon karaan kuwo aan suurtogal ahayn in la sameeyo ama mid ay adagtahay samayntooda. Waa muhiim in aad dhakhtarka u sheegtid kahor baaritaanka haddii gudniinka laguu sameeyay.

Baaritaanka Misigta:

Inta lagu guda jiro baaritaanka misigta, dhakhtarka OB/GYN wuxuu isticmaali doonaa farihiisa si uu ugu riixo qaybta dibada ah ee jirkaaga, asaga ama ayada oo ka baaraya ilmo-galeenka, afka ilmo-galeenka, tuubadaha ugxanta, ugxanta, iyo kaadi haysta wax dhibaato ama calaamado xanuun ah. Marka hore dhakhtarka wuxuu baaritaan ku samaynayaa afka hore ee xubinka taranka, asaga oo ka fiirinaya wax dheecaan ama fiix, cun-cun, ama dheecaan aan ficnayn. Kadibna dhakhtarka wuxuu gelin doonaa xubinkaaga taranka qalab wax lagu fiiriyo wuxuuna baaritaan ku samayn doonaa unugyadaada taranka ee gudaha ah. Inta baddan, baaritaankan wuxuu qaadanayaa kaliya dhowr daqiiqado mana lahan wax xanuun ah, waloow ay dhici karto in aad dareentid xoogaa raaxo la'aan ah. Waxaa lagu talinayaa in aad baaritaankaan u samaysid si sannadle ah inta lagu guda jiro sannadahaaga taranka ama dhalmada.



Baaritaanka Raximka ama Ilmo-galeenka:

Baaritaanka raximka ama ilmo-galeenka inta baddan waxaa la sameeyaa inta lagu guda jiro baaritaanka misigta halkaas oo dhakhtarka kasoo qaadayo muunad yar oo unugyo ah dhinaca afka ilmo-galeenka si uu uga baaro kansarka ku dhaca afka ilmo-galeenka, kansarka ku dhaca kaliya dumarka. Mararka qaar baaritaanka raximka ama ilmo-galeenka wuxuu leeyahay xoogaa xanuun ah,

waloow ay qaadanayso dhowr ilbiriqsiyo oo kaliya. Dumarka ay da'doodu tahay 21-29 waxaa lagula talinayaa in ay sameeyaan baaritaanka raximka ama ilmo-galeenka sannad kasta. Dumarka ay da'doodu tahay 30 iyo ka weyn baaritaanka raximka ama ilmo-galeenka kaliya waxaa loo baahanyahay sannad kale oo kasta aan ka ahayn haddii ay jiraan waxyaabo aan ficnayn ama calaamado xanuun xiriir la leh qaybaha jirkaaga ee hoose. Qaar kamid ah dhaqamada waxay aaminsanyihiin in baaritaanka raximka ama ilmo-galeenka uu dilaacinayo bikradaada, inta baddana ah calaamad sheegaysa in qofta dumarka ahi ay weysay bikradeeda. Si kastaba, ma jiro daliil sheegaya in baaritaanka raximka ama ilmo-galeenka uu u dilaacinayo ama u weynaynayo bikradaada qaab kasta oo ay noqoto.

Haddii laga joogo muddo ka baddan hal sanno tan iyo markii ay gabadhaadu u tagtay dhakhtarka, u samee ballan dhakhtar hadda. In la sameeyo baaritaan sannadle ah uma ahan kaliya mid u wanaagsan caafimaadkeeda, laakiin sidoo kale waxaaba loogu baahanyahay isku diiwaangelinta iskuulka.

Haddii gudniin laguugu sameeyay, in aad aadid dhakhtarka waxay noqon kartaa mid leh dareemo baddan leh. Tixgeli in aad qof kala hadashid (saaxiib, qof qaraabo ah, oday diimeed, ama lataliye) waxyaabaha ku saabsan dareemahaaga kahor iyo kadib ballanta dhakhtarkaaga. Sidoo kale waxaad dareemi kartaa raaxo la'aan sababtoo ah waxaad ka baqaysaa in lagu cambaareeyo. Xusuusnoow, Gudniinka Gabdhaha ma ahan mid adiga khaladkaaga ah waana mid lid ku ah sharciga ka jira Dalka Maraykanka in ay dhakhtaradu kugu takooraan adiga (ama qofkasta) Gudniinka Gabdhaha darteeda.

U tagida Gabadhaadu ay u tagto Dhakhtarka

Inta baddan, gabadhaada laguma samaynayo baaritaankeeda koowaad ee misigta iyo baaritaanka raximka ama ilmo-galeenka illaa ay ka dhaafto da'da 18 sanno. Si kastaba, Dhakhtarkeeda Daryeelka Aasaasiga ah ama Dhakhtarka carruurta ayaa ku samayn kara baaritaanka cudurada dumarka kadib marka uu ku dhaco wareega dhiigeeda caadada ee koowaad. Gabadhaada waxaa khasab ku ah in ay ugu tagto Dhakhtarka Daryeelka Aasaasiga ah si sannadle ah si ay u hubsato in ay usii weynaanayso una korayso si caafimaad leh, una baarto wax kasta oo calaamado xanuun ah, ama si ay usoo qaadato talaalo cusub oo difaaca jirka ah intiiba ay u baahato. Marka ay aadayso dhakhtarka, waxaa khasab kugu ah in aad qolka kula jirtid si ay raaxo u dareento ama u weydiiso wax kasta oo su'aalo ah inta lagu guda jiro baaritaanka. Waxay hubin doonaan miisaanka, dhererka, araga, maqalka, cadaadiska dhiiga, sambabada, iyo culeyska jirka ee gabadhaada. Sidoo kale waxay weydiin doonaan su'aalo ku saabsan hurdadeeda iyo wax cunisteeda ama calaamado ku saabsan qaan gaarnimada.

Hooyooyinka, ka fikira arinta...

- Ma tahay adiga ama gabadhaada kuwo soo booqda dhakhtarka ugu yaraan halmar sannadkii?
- Haddii laguugu sameeyay Gudniinka Gabdhaha, ma u sheegtay dhakhtarkaaga? Midaan waxay ku caawin kartaa dhakhtarka in uu diyaar u noqdo kahor baaritaanka si ay u oggaadaan qaabka ay kuu siin karaan daryeelka ugu wanaagsan. Ma tixgelisay in aad codsatid turjubaan si uu kuugu caawiyo ka hadlida arimaha xasaasiga ah sida kuwaan oo kale?
- Keentid xogta BRYCS, *La biloowdid Wada sheekaysi Dhakhtarkaaga* (fiiri bogga 65) ee ballantaada. Xogtan waxay bixinaysaa sharaxaad ku saabsan Gudniinka Gabdhaha ee ay sameeyeen dhakhtarada sidoo kale macluumaad ku saabsan khibradaada iyo wel-weladaada caafimaadka.

Loogu talogalay Gabdhaha

Gabdhuhu inta baddan waxay aadaan dhakhtar sannad kasta si loogu soo sameeyo baaritaan sannadleah, mararka qaarna lagu magacaabo 'baaritaanka ficnaanshaha.' Midaana waxaa loo sameeyaa si uu dhakhtarka u baaro caafimaadkaaga una hubsado in aad u weynaanaysid una koraysid si caafimaad leh. Marka aad la joogtid dhakhtarka, waxay hubinayaan miisaankaaga, dhererkaaga, aragaaga, maqalkaaga, cadaadiska dhiigaaga, sambabadaada, iyo wax kasta oo culeyska jirka ah. Sidoo kale waxay weydiin doonaan su'aalo ku saabsan hurdadaada iyo wax cunistaada waxayna baarayaan calaamado ku saabsan qaan gaarnimada. Haddii ay kuu soo baxayaan naaso, timaha shuunka, ama kugu dhacay wareega dhiigaaga caadada, dhakhtarka wuxuu ku weydiin karaan su'aalooyin arimahaan ku saabsan. Waxay noqon kartaa mid aan lagu dareemin raaxo marka uu dhakhtarka ku weydiinayo su'aalo kuwaan oo kale ah ama uu taabto qaybaha jirkaaga inta lagu guda jiro baaritaanka, laakiin waa baaritaan muhiim u ah caafimaadkaaga. Iska hubso in ay hooyadaada ama qofkale oo aad ku kalsoontahay ku gula jiro qolka inta aad baaritaanka samaynaysid. Haddii aad doonaysid in aad dhakhtarka weydiisid su'aalo, haka laalaabanin in aad weydiisid! Ayagu way u barteen in la weydiiyo dhammaan noocyada kala duwan ee su'aalaha ah.

Qaar kamid ah dhaqamada ka jira jaaliyadaha qaarkooda, Gudniinka Gabdhaha waa mid la qariyo asaga iyo arimaha kale ee ku saabsan qaan gaarnimada, sidaas darteeda in dhakhtarkaaga lagala hadlo arimahaas oo kale waxay noqon kartaa mid cabsi leh. Hase ahaatee, waa muhiim in loo sheego dhakhtarkaaga haddii aad samaysay Gudniinka Gabdhaha ama haddii aad qabtid wax calaamado ama xanuun ah oo gudniinka xiriir la leh. Gudniinka Gabdhaha waa mid sharci daro ka ah oona ku yar gudaha Dalka Maraykanka haddaba in dhakhtarkaaga hore loogu sheego waxay ku caawinaysaa in ay si fiican kuu daaweeyaan.

> Gabdhuhu waxay dhakhtarka u tagaan halmar sannadkii si loogu soo sameeyo baaritaanka ficnaanshaha. Isbedelada xiriirka la leh qaan gaarnimada khasab kama dhigaan in loo tago dhakhtarka meel ka baxsan baaritaankaaga-caadiga ah. Si kastaba, haddii aad la kulmaysid xanuun ama raaxo la'aan midaas oo ah mid aan caadi ahayn ama xiriir la leh Gudniinka Gabdhaha, u sheeg hooyadaada ama daryeel bixiyaha hadda. Waxay noqon kartaa mid muhiim kuu ah in aad jadwal u samaysatid ballanta dhakhtarkaaga.

In lagala hadlo dhakhtarkaaga waxyaabaha ku saabsan khibradaada aad lasoo martay Gudniinka Gabdhaha waxay sidoo kale keeni kartaa dareen baddan. Waxaa dhici karta in aad dareentid xishood, wareer, murug, ama xanaaq ku aadan in gudniinka laguugu sameeyay. Haddii aad sidaan dareentid, waa muhiim in lagala hadlo dareemahaaga qof weyn oo aad ku kalsoontahay. Qofkaan wuxuu noqon karaa hooyadaada, qof aad qaraabo tihiin, macalinkaaga iskuulka, ama oday diimeed.

Qalbiga kasoo baxa gaarana Qalbiga

Weydii Gabadhaada

- Ma jiraan wax su'aalo ah oo aad jeceshahay in aad weydiisid dhakhtarkaaga ballantaada xigta?
- Ma jiraan wax su'aalo ah oo aad ka xishoonaysid in aad weydiisid dhakhtarka? Mararka qaar waxay noqonaysaa raaxo la'aan in la weydiiyo su'aalo ku saabsan jirkaaga, laakiin dhakhtarada way u barteen in la weydiiyo dhammaan noocyada su'aalaha ah waxayna halkan u joogaan in ay anaga na caawiyaan.

Weydii Hooyadaada

- Ma jiraan wax ku saabsan taariikhda caafimaad ee qoyskeena waxaas oo ay khasab tahay in aan oggaado?
- Ma qabtaa wax soo jeedino oo su'aal ah waxaas oo ay khasab tahay in aan weydiiyo dhakhtarka?
- Ma jiraan farqiyo u dhaxeeya u tagida dhakhtarka loogu tago Dalka Maraykanka iyo in dhakhtarka loogu tago waddankeena?

Ii sheeg sheeko

Qaata wakhti aad ku wadaagtaan ama isugu sheegtaan sheekooyin. Ka dooro liiskan ama weydii wax kale oo aad doonaysid in aad oggaatid!